HORIZON INSTITUTE



Taxanihii Saddexaad ee Fashil Wadareed

# CIQAABTA CARRUURTA IN MUDDO DHEER AY KU QAATAAN XABSIGA DANBIYO YARYAR OO AY GALAAN AWGII

NOVEMEBR 2020

# HORDHAC

Waxa arrin laga xumaado ah in xabsiga loo arko jawaabta ku munaasibka ah marka carruurta da'doodu u dhaxayso 15 illaa 17 sanno ay galaan danbiyo Somaliland. Waxa laga fogeeyaa qoyskooda, asxaabtoda, dugsigooda iyo bulshadoodii, waxana goob lagula xidhaa dad waaweyn oo danbiileyaal ah, kuwaas oo qaar kood galaan danbiyo culus. Carruurtaas, xabsigu waxa uu xaddiday xidhiidhkii ay la yeelan lahaayeen qoyskooda, waxayna ka dhigan tahay in dhawr bilood ama sannado ayna helayn waxbarasho rasmi ah, waqtigii ugu qaalisanaa noloshooda.

Dhaqanka in xabsiga la dhigo carruurtu waa mid caadi ka ah qaybo badan oo adduunka ah, halkaas oo sida Somaliland oo kale ciqaab looga dhigo in ay waqti ku qaataan xabsiga. Way yartahay tacabka la geliyo sidii carruurtaa loo kobcin lahaa garaad kooda, looga dhigi lahaa muwaadiniin waxtar leh, una shaqeeya bulshadooda.

Xabsiyeyntu may ahayn in ay noqoto jawaabta. Xeerka Garsoorka Carruurtu waxa uu garsooreyaasha u dejinayaa hannaan suubban oo ay raacaan marka ay go'aanka ka gaadhayaan qaabka ay uga jawaab celinayaan qof dhallinyaro ah oo danbi galay. Xeerkani waxa uu ka dalbayaa garsooreyaasha in ay ula dhaqmaan carruurta si shakhsi ah iskuna dayaan in ay ogaadaan sababta ku dhalisay in ay maxkamadda hor yimaadaan. Xeerku waxa uu ka reebayaa fikirkooda gaaban ee ah in la ciqaabo, wuxuuna ku dhiiri gelinayaa in ay ka fikiraan mustaqbalka fog oo ah sidii loo horumarin lahaa gooba dhaqan celinta dhallaanka. Hadafkaa waxa lagu gaadhayaa iyada oo loo arko in xabsigu noqdo waxa ugu danbeeya ee laga maarmi waayo, iyo haddiiba ay dhacdo in uu noqdo mudada ugu gaaban oo dhallinyar kasta oo lagu helo danbi ay ku qaataan. Xeerku waxa uu farayaa garsooreyaasha in ay tixgeliyaan ciqaabta ku salaysan bulshada ee loo yaqaano xadhiga ka leexinta carruurta ee hannaanka caddaalad ciqaabeedka kiis kasta oo la xidhiidha carruurta.

Xeerarkani waxa ay siinayaan garsooreyaasha awood ay kula dhaqmaan caruurta in ay carruur yihiin, oo ayna ahayn dad waaweyn. *Ciqaabta Carruurta In Muddo Dheer ay Ku Qaataan Xabsiga Danbiyo yaryar oo ay Galaan Awgii* waxa uu faahfaahinayaa sida ayna dhallinyartaasi inta badan u helin dhawristaa sharci isla markaa ay bilo iyo sannado ku qaataan xabsiga. Warbixintu sidoo kale waxa ay falanqaynaysaa xeerarkaasi, haddii la fuliyo, in dhallinyartaasi ayna xabsiga galeen, gurigooda, dugsigooda iyo bulshadoodana ku dhex jiri lahaayeen halkaas oo ay ka heli lahaayeen fursad weyn oo ay ku noqdaan muwaadiniin toosan oo waxtar leh.

Warbixintani waa qaybtii saddexaad oo kamid ah taxane shan qaybood ka kooabn, *Fashil-wadareed: Sida uu Hanaanka Cadaaladda Danbiyada ee Somaliland uu u Waxyeelleeyo Carruurta iyo Waxa aan Ka Wada Qaban Karno*. Ujeedada taxanuhu waa sidii loo abuuri lahaa in dadweynuhu u dhug yeeshaan isla markaa ay kalsooni yeeshaan ay ku soo bandhigaan caddaalad darradaas. Afarta mawduuc ee kale waxa ay kala yihiin: maxay sharci darro u tahay in la ciqaabo carruurta 14 jir iyo ka yar ee ku xusan Taxanaha Koowaad; sida garsooreyaashu ugu ciqaabaan caruurta wakhtiyo dhaadheer oo xabsi marka loo eego dambiyada yar-yar ee ku xusan Taxanaha Saddexaad; sida nidaamka caddaalad ciqaabeedku uu meesha uga saaray masuuliyaddii qoyska, doorkii bulshada, isku duubnidii iyo barnaamijkii waxbarashada xukuumadda iyo adeeggii bulshada ee ku xusan Taxanaha Afraad; iyo tallaabooyinka ay hadda qaadi karaan dadka ka shaqeeya nidaamka caddaalad ciqaabeedku, iyaga oo aan eegaynin inta yar ee dhaqaalaha haysata, si loo xaqiijiyo in ilmo kasta loola dhaqmo inuu yahay ilmo yar ee ku xusan Taxanaha Shanaad. Xeerarka Somaliland way illaaliyaan carruurta. Waa masuuliyad qof kasta saaran sidii loo hirgelin lahaa.

# TAXANIHII SADDEXAAD

## CIQAABTA CARRUURTA IN MUDDO DHEER AY KU QAATAAN XABSIGA DANBIYO YARYAR OO AY GALAAN AWGII

*Marka Somaliland ilmo da'diisu u dhaxayso 15 illaa 17 uu danbi galo, garsooreyaashu waa in ay tixgeliyaan fursado badan marka ay xukunka ridayaan. Xabsigu waa mid kamid ah waxyaabaha suurtagalka ah waana in uu noqdaa xalka ugu danbaya.*



*Bukhari (dhexda) oo guriga la jooga qoyskiisa kadib markii laga soo daayey xabsiga.*

Bukhari Awil Mohamed[1] waxa uu ahaa 15 jir markii lagu xukumay 2 sanno oo xabsi ah telefoon uu xaday awgii. Qiimaha telefoonku waxa uu ahaa $50 USD. Waxa ay ahayd markii koowaad ee uu sharciga ku gefo. Ka hor intii aan la xidhin ee aan lagu soo Eedayn danbiga, Bukhari dugsiga ayuu tagi jiray qoyskiisana wuu caawin jiray. Waxa maxkamadda lagu saaray Hargeysa, danbiga ayaa lagu helay waxana loo diray 2 sanno oo Xabsiga Mandheera ah. Nasiib darro, qoyskiisu may awoodin lacag ay ku qabsadaan qareen si uu u difaaco isaga.

[1] *Hay'adda Horizon* ayaa u fidisay gargaar sharci Bukhari. Aabbihii ayaa saxeexay in sawirkiisa la baahin karo iyo in sheekadiisa loo isticmaali karo iyada oo la rajaynayo in tusaalihiisu kor u qaado nidaamka caddaalad ciqaabeedka habka uu ula dhaqmo carruurta.

Bukhari waxa uu ku danbeeyey in qol xabsiga ah lagula xidho carruur kale oo wiilal ah iyo dhallinyar kale. Xidhiidh joogto ah lamuu lahayn aabbihii iyo xubnaha kale ee qoyskiisa. Muu helin waxbarasho ama buugaagtii uu wax ka dhigan lahaa. Bukhari waxa ay kala go'een noloshii dhallaanimo ee uu garanayey telefoon uu xaday awgii. Inkasta oo danbi lagu helay, balse may ahayn in laga fogeeyo qoyskiisa iyo dugsigiisa.

Xeerarka Somaliland waxa ay qirayaan in iyada oo carruurta da'doodu u dhaxayso 15 illaa 17 ay si fiican u kala garanayaan qaladka iyo saxa oo maxkamaddu kula xisaabtami karto ficilada ay geystaan, hadana may ahayn in habdhaqankoodaa loogu ciqaabo si lamid ah ciqaabta la mariyo dadka waaweyn.[2]

Arrintan laga soo reebay waa hab uu sharcigu bulshada ku fahansiinayo in dhallinyartu ay ka duwan yihiin dadka waaweyn. 15 jir illaa 17, dhallinyartu waxa ay jidh ahaan u muuqdaan dad waaweyn. Balse wali garaadkoodu wuu korayaa wayna kooban tahay inta la canaan karaa.[3] Waxa laga yaabaa in ay geystaan dhaawac jidheed ee qof weyn geysan karo, balse ma laha awoodda ay ku xakamayn karaan habdhaqankooda ama ay ku weelayn karaan cawaaqibta ka dhalan karta. Sida dhammaan waalidka oo dhami ogyihiin, dhallinyartu inta ay geed ka boodaan ayay talo ka boodaan. Waxa kale oo ay leeyihiin in ay koraan isbaddalna sameeyaan in ka badan dadka waaweyn. Sharcigu waxa uu qirayaa habdhaqankaa goonida u ah carruurta waxanu dejinayaa tallaabooyin uu ku illaalinayo, gaar ahaan marka uu garsooruhu go'aan ka gaadhayo sida uu ula dhaqmayo dhallinyar lagu helay danbi.

Sida ku xusan Xeerka Garsoorka Carruurta ee 2007, waxa jira xukuno aan garsooraha *marnaba* loo ogolayn in uu ku rido ilmaha ka yar 18 jir. Ciqaabta dilka, jidh-dilka iyo xabsi daayinka looma ogola.[4] Xataa haddii ilmuhu qorshayno ama uu dil gaysto, dil laguma xukumi karo sida dadka waaweyn.[5] Garsooreyaasha waxa ka mamnuuc ah in ay dhalleeceeyaan carruurta, xataa kuwa falalka arxandarada ah gaysta, sababtoo ah sharcigu waxa uu qirayaa in ayna awoodin xakamaynta naftooda isla markaa ay arki karaan cawaaqibta xun ee ka dhalan karta ficilkoodaas.

Qodobada sharcigu kama dhigna carruurta da'doodu u dhaxayso 15 illaa 17, ee danbiyada galaa in si dhib yar logu fuliyo ciqaabta isla markaa aan lagala xisaabtamin falka ay ku kaceen. Sharcigu waxa uu siinayaa garsooraha dhawr hab oo uu kula xisaabtami karo dhallinyarta sharciga jabiya. Hababkaa kala duwani waxa loogu tallo galay in la isku dheeli tiro dhibta uu gaystay ilmuhu iyo waxa ku dhici doona mustaqbalka iyo aayaha danbe ee ilmahaas.[6] Garsooruhu waxa uu go'aamin karaa in uu gebi ahaanba iska saamaxo ilmaha danbiga yar gaysta haddii uu u malaynayo in ay fahmeen qaladkii uu ku kacay.[7] Arrintan waxa la yidhaa cafis garsoor. Duruufaha la isticmaali karo dhawristan sharci aad ayay u kooban tahay. Dambiga ay maxkamaddu ku xukumayso qofkaa dhallinyarta ahi waa in uun noqdaa ugu badnaan 3 sanno oo xabsi ah. Markaas uunbaa ilmaha lagu sii deyn karaa cafis garsoore.

[2] Qodobka 10(2), Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta (2007) (loo soo gaabiyey: "XNGC"). Iyo Qodobka 60, Xeerka Ciqaabta (1962) (loo soo gaabiyey: "Xeerka Ciqaabta").
[3] Barry C. Feld, *Adolescent Criminal Responsibility, Proportionality, and Sentencing Policy: Roper, Graham, Miller/Jackson, and the Youth Discount*, 31 Law & Inequality 263 (2013).
[4] Qodobka 12, XNGC.
[5] Qodobada 90 iyo 434, Xeerka Ciqaabta.
[6] Qodobka 8, XNGC.
[7] Qodobka 147, Xeerka Ciqaabta.

Waxa muhiim ah, marka go'aan laga gaadhayo in ilmaha lagu sii daayo cafis garsoore, garsooruhu waa in uu kalsooni buuxda ku qabaa in uu arrimaha oo dhan dhinac kasta ka eegay, iyo in uuna mar danbe danbi ku kacayn ilmuhu. Tani waxa ay fursad u siinaysaa garsooreyaasha in ay fursad labaad siiyaan marka duruuftu u saamaxdo, iyo haddii ay dani ugu jirto ilmaha sidaa, halkii xabsiga la dhigi lahaa. Garsooruhu waxa uu sidoo kale armrayaa carruurta inay sameeyaan shaqo wanagsan bulshada dhexdeeda taasi oo ah mid loo qoondeeyey inay jawaab u noqoto iyaga iyo in la baro masuuliyada.[8] Waxana loo yaqaanaa dhaqancelin. Waxa kamid noqon kara amarka in uu ilmuhu tago dugsiga, raali-gelin rasmi ah bixiyo, magdhaw siiyo dhibanaha, ama tallaabooyin kale oo badan.[9] Xeerka Garsoorka Carruurtu waxa uu farayaa garsooreyaasha marka koowaad in ay tixgeliyaan noocan ciqaabta ah ka hor inta ayna u dirin ilmaha dhallinyarta ah xabsiga. Ujeedada amarka dhaqancelintu waa in la baro ilmaha in waxa uu sameeyey/samaysay yahay arrrin aan la aqbali karin iyo in lagu hago sidii ay uga qoomamayn lahaayeen ficiladooda iyaga oo aan loo dirin xabsiga. Waxa ay qabanaysaa shaqada in carruurtu ayna xor iska noqon marka ay arrin qalad ah galaan, halka ay garsooraha siinayso awoodda uu kula dhaqmayo ilmaha isaga oo tixgelinaya da'da uu yahay.

Balse, waxa jira duruufo uu garsooruhu u arki karo in ay daruuri tahay in ilmaha da'diisu u dhaxayso 15 illaa 17 sanno loo diro xabsiga. Haddii garsooruhu, kadib marka uu ka baaraan dego dhaqancelinta, uu go'aansado in ay waajib tahay in uu ilmaha ku rido ciqaab loogu dirayo xabsiga, wuu samayn karaa arrintaa. Balse tani waa in ay noqotaa tallaabada ugu danbaysa iyo waqtiga ugu gaaban ee suurtagalka ah.[10] Iyo in waqtiga xabsiga uu ku qaadanayo ilmaha dhallinyarta ahi ay noqoto muddo ka gaaban ta uu ku qaadan lahaa qof weyn oo isla danbigaas galay.[11] Sida caadiga ah waa in ciqaabta lagu ridayo ilmaha waa in ay ka yaraataa saddex dalool meel ta a qofka weyn.[12] Tusaale ahaan, haddii qof weyn lagu xukumay 3 sanno danbi uu galay, ilmaha 15-17 jirka ah waa in lagu xukumayaa 2 sanno haddii damigu isku mid yahay. Iyada oo aan la eegayn nooca danbiga uu galay ilmuhu, mudada ugu dheer ee xabsi ee uu garsoore ilma yar ku xukumi karaa waa 15 sanno.[13] Waxa ay ka turjumaysaa sida uu sharcigu u qirayo farqiga u dhexeeya ilmaha iyo qofka weyn sida ay u qaadayaan masuuliyadda tallaabooyinka ay ku kacayaan. Waxa ay xaqiijinaysaa in dhallinyartu ayna muddo dheer ku qaadan xabsiga taas oo saameyn taban ku yeelanaysa kobacooga iyo awooddooda ay dib ugula midoobayaan bulshadooda.

Marka laga yimaado dhawristaa sharci, Bukhari waxa ku dhacay 2 sanno oo xukun xabsi ah telefoon $50 dollar oo uu xaday awgii. Garsooruhu waxa uu soo yareeyay xukunkiisii 3 sanno ahaa isaga oo ka dhigay 2 sanno da'diisa awgii. Balse aabbihi, sida waalid kastaa dareemayo, waxa uu u arkayey muddo aad u dheer. Waxa uu racfaan ka qaatay kiiska ilmihiisa. Racfaankaas, *Hay'adda Horizon*, waxa ay gargaar sharci u fidisay Bukhari iyo qareen. Qareenku waxa uu ku dooday in ay tahay markii koowaad ee Bukhari sharciga ka hor yimaado, in uu dugsiga tagi jiray iyo in uu dhaqaale ahaan qoyskiisa caawin jiray, iyo in xabsigu uuna dan u ahayn. Sidoo kale waxa uu hoosta ka xarriiqay in aabbihii diyaar u yahay in uu bixiyo lacagtii telefoonka.

[8] Qodobka 67, XNGC. Somaliland, garsooreyaasha oo kaliya ayaa awood u leh in ay dhaqancelin u diraan ilmaha. Eeg Qodobka 67, XNGC.

[9] Qodobka 71, XNGC.

[10] Qodobka 8, XNGC.

[11] Qodobka 10, XNGC iyo Qodobka 60, Xeerka Ciqaabta.

[12] Qodobka 119, Xeerka Ciqaabta.

[13] Qodobka 12, XNGC.

Maxkamadda Racfaanka Maroodi-Jeex ayaa ogolaatay. October 2019, waxa ay ku soo koobeen mudadii xabsiga intii uu hore ugu qaatay iyo in la bixiyo kharashka telefoonka. Aabbihii ayaa bixiyey $50 USD telefoonkii la xaday Bukhaarina gurigoodii ayuu tagay.

# Carruurta Bilo iyo Sannado ku qaata Xabsiga

Bukhari keli kuma aha carruurta muddo dheer ku qaatay xabsiga danbi aan sidaa u cuslayn awgii. Dhallinyar kale oo reer Somaliland ah ayaa sidoo kale bilo iyo sannado xabsiga ku laastay.

Dhammaan carruurta hoos ku xusan, *Hay'adda Horizon* ayaa gargaar sharci u fidisay. Waa muunad kamid ah dhallinyarta da'doodu u dhaxayso 15- 17 jir ee lagu helay danbiyada goobo kala duwan oo Somaliland ah halkaas oo ay ka hawlgasho *Horizon*. Magacyada koowaad uunbaa la isticmaalay si loo ilaaliyo xogtooda.

Sida Bukhari oo kale, 43 kamid ah wiilashan waxa lagu helay in ay telefoono xadeen. Dhibaatada xadista telefoonadu waa dhibaato ay bulshadu dareemayso in ay sii kordhayso, gaar ahaan caasimadda Hargeysa. Si arrintaa looga falceliyo, hay'adaha ammaanku waxa ay guluf ku qaadeen dadka loo tuhansan yahay in ay xadaan telefoonada oo ay carruurtu ku jiraan. Had iyo jeer xeer-ilaalintu waxa ay ku soo oogtaa budhcad (danbigaas oo ciqaabtiisu noqon karto inta u dhaxaysa 3 illaa 10 sanno oo xabsi ah) halkii ay kaga soo oogi lahaayeen tuuganimo (danbigaas oo ciqaabtiisa ugu badani tahay 3 sanno) si loogu rido ciqaabta ugu sarraysa. budhcadu waxay fursad u siinayaa xeer-ilaaliyaha in ilmaha muddo dheer loo diro xabsiga, gaar ahaan marka qoysku ayna awoodin in ay qabsadaan qareenka difaaca ilmuhuna uu kali ku noqdo mudada ay socoto dhegaysiga dacwaddiisu. Waana ta ku dhacday Bukhari. Bukhari aabbihii, Awil Mohamed Jama, ayaa ka waramaya waayihii soo maray kadib markii la sii daayey inankiisa.

> Waqtigaas, ma garanayn faraqa u dhexeeya budhcada iyo tuuganimada. Balse hadda waan ogaaday. Xataa inankaygu muu garanayn cawaaqibta budhcadnimo ku yeelan karto noloshiisa.[14]

Intaa waxa dheer, haddii xeer-ilaaliyuhu waayo ciqaabti uu doonayey in lagu rido ilmaha, sida mid kamid ah kiisaskani sheegayaan, waxa ay racfaan u qaataan in ciqaab intaa ka badan lagu rido. Ama, sida kiis kale xusayo, xataa haddii qoysku siiyaan dhibanaha una celiyaan dhibtii soo gaadhay, dhibanuhuna cafiyo ilmaha, xeer-illaalintu way sii wadaan kiiska.

Carruurta 15 illaa 17 sanno ah laguna helo danbiga waa waajib in lagula xisaabtamo habdhaqan kooda. Balse xabsiga mudada dheeri, sidii aynu hore u soo xusnay, maaha jawaabtii ku munaasibka ahayd ee xeer-ilaalinta iyo garsooruhu qaadi lahaayeen, waxana la gudboon in ay tixgeliyaan sidii looga maarmi lahaa in ilmaha loo diro xabsiga muddo dheer. Kiisaska hoos ku xusan, carruurta waxa xabsiga loo diray illaa 4 sanno, halka kiis Gabiley ahna loo diray 6 sanno, telefoon uu xaday awgii. Tallaabooyinkaasi maaha mid marnaba cudur dar loogu heli karo.

[14] Waraysi Hargeysa lagu qaaday 23 November 2019.

- Mubarik (15) iyo Ahmed (17) waxa lagu eedeeyey in ay xadeen telefoon, waa la xidhay waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Cigaal Airport. Way qirteen waxana lagu xukumay budhcad July 2019. 3 sanno oo xabsi ah ayaa lagu xukumay waxana loo diray Xabsiga Dhexe ee Hargeysa. April 2020 ayaa inamada lagu sii daayey Cafis Madaxweyne.

- Abubaker (16) waxa lagu xidhay Saldhigga Booliska ee Iftin June 2019. Waxa lagu soo eedeeyey in uu xaday telefoon. Garsoore ayaa danbiga ku helay kuna xukumay 2 sanno oo xabsi ah July 2019.

- Mohamed (16) waxa lagu xidhay dagaal waxana lagu hayey Saldhigga Booliska Iftin June 2019. Billawgii eeddu waxay ahayd dhaawac yar oo fudud. Kadib baadhihii booliska ayaa dacwadda u baddelay budhcad kadib markii Mohamed sidoo kale lagu soo eedeeyey in uu xaday telefoon. Waxa lagu helay danbiga September 2019 waxana lagu xukumay 3 sanno. Mohamed May 2020 ayaa lagu sii daayey Cafiskii Madaxweynaha.

- Abdihakeem (15) waxa loo xidhay telefoon uu xaday August 2019 waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Daloodho. November 2019 ayaa danbigii lagu helay waxana lagu xukumay 1 sanno. Maadaama 1 sanno lagu xukumay, qoyskiisa ayaa iibsaday xukunkii waxana loo baddalay ganaax sidaas ayuu Abdihakeem ku tagay gurigiisa.[15]

- Abdikadir (16) iyo Subeer (15) waxa la xidhay January 2020 waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Daloodho. Waxa lagu eedeeyey in ay xadeen telefoon. May 2020, ayaa danbiga lagu helay. Abdikadir ganaax ayaa lagu xukumay halka Subeerna ay maxkamaddu ku xukuntay 6 billood. Xeer-ilaalinta ayaa racfaan ka qaadatay iyaga oo ku sababaynaya in ciqaabtu aanay ku filnayn. Maxkamadda Racfaanka ee Maroodi-jeex ayaa waafaqday ganaaxii iyo 6 dii billood ee xabsiga.

- Liiban (15) waxa lagu hayey Saldhigga Booliska ee Daloodho February 2020. Waxa lagu eedeeyey in uu saaxiibkii ka caawiyey in uu xado telefoon. Danbiga ayaa lagu helay, maxkamadduna waxa ay ku xukuntay 1 sanno iyo 6 billood oo xabsi ah.

- Subeer (15), Omer (15), iyo Abdilahi (15) waa la xidhay waxana lagu hayey Saldhigga booliska ee Koodbuur in ay xadeen telefoon July 2019. Danbiga ayaa lagu helay waxana lagu xukumay 1 sanno oo xabsi ah September 2019.

- Hamse (17) waxa la xidhay March 2020 waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Koodbuur. Waxa uu xaday telefoon. Danbiga ayaa lagu helay waxana lagu xukumay 1 sanno oo xabsi ah April 2020 waxana loo diray Xabsiga Dhexe ee Hargeysa si uu ugu qaato mudada xabsigiisa.

- Hamse (15), Mohamed (16) iyo Mukhtar (16) waa la xidhay waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Koodbuur October 2019. Waxa lagu eedeeyey in ay xadeen telefoon. Qoyskooda ayaa dhibanihii siiyay lacagtii. Balse xeer-ilaalinta ayaa ku adkaystay in ay kiiska u gudbiyaan maxkamadda. Garsoore ayaa danbiga ku helay kuna xukumay 1 sanno iyo 8 billood oo xabsi ah November 2019.

[15] Qodobka 125 ee Xeerka Habka Ciqaabtu waxa uu ogolaanayaa in xabsiga 1 sanno iyo ka yar la iibsan karo, taas oo ka dhigan in mudada xabsiga loo baddeli karo lacag ganaax ah taas oo la bixiyo halkii uu qofka mudadaa xabsiga ku qaadan lahaa.

- Yahye (17) waa la xidhay waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Qudhac Dheer telefoon uu xaday awgii. Danbiga ayaa lagu helay March 2020 waxana lagu xukumay 2 sanno iyo 6 billood.

- Hamse (16) waa la xidhay waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Maxamed Mooge February 2020. Waxa lagu eedeeyey telefoon uu xaday. Maxkamad Hargeysa ku taala ayaa ku xukuntay 8 billood February 2020.

- Mohamed (16), Jimaale (16), iyo Abdirahman (17) waa la xidhay waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Mohamed Mooge July 2019. Waxa lagu eedeeyey in ay xadeen telefoon. Dhibanihii ayay u celiyeen telefoonkii wayna ka cafisay danbigii ay galeen. Balse xeer-ilaalintu waxa ay go'aansatay in ay maxkamadeeyaan. Waxa lagu xukumay 1 sanno oo xabsi ah July 2019.

- Mawlid (15) waa la xidhay waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Mohamed Mooge kadib markii qof ku eedeeyey in uu xaday telefoon iyo koodh/jaakeed August 2019. Waxa lagu xukumay 4 sanno oo xabsi ah. Xukunkiisa waxa hoos ll dhigay 2 sanno racfaan uu qaateen awgeed bishii December 2019.

- Muhyadin (16) waxa lagu hayey Saldhigga Booliska ee Mohamed Mooge in uu xaday telefoon iyo jaakeed isaga oo la socday Mawliid oo kor ku xusan. Waxa lagu xukumay 3 sanno oo xabsi ah. Kadib Racfaan uu qaatay awgeed December 2019 waxa lagu soo koobay xukunkii 1 sanno.

- Abdifatah (17), Osama (16), iyo Abdinasir (16) waxa la xidhay February 2020 waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Cabdi Iidaan. Waxa ay xadeen telefoon. March 2020 ayaa lagu helay danbiga waxana lagu xukumay 2 sanno oo xabsi ah iyo ganaax lacageed 300,000 Somaliland Shilling. Inamada waxa lagu sii daayey Cafiskii Madaxweynaha ee May 2020.

- Abdisamad (15) waxa la xidhay February 2020 waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee New Hargeysa. Waxa lagu eedeeyey in uu xaday telefoon. Garsoore ayaa danbiga ku helay May 2020 kuna xukumay 3 sanno oo xabsi ah.

- Jimaale (17) waa la xidhay waxana lagu hayey Saldhigga Dhexe ee Hargeysa kadib markii lagu soo eedeeyey in uu xaday telefoon dhaawacna qof gaadhsiiyey intii uu xadayey. Danbiga ayaa lagu helay waxana lagu xukumay 3 sanno oo xabsi ah January 2020. Waxa lagu sii daayey Cafis Madaxweyne May 2020.

- Yahye (16) Hargeysa ayaa lagu xidhay December 2018. Waxa lagu eedeeyey in uu iibsaday telefoon la soo xaday. Danbiga ayaa lagu helay waxana lagu xukumay 2 sanno oo xabsi ah February 2019. Waxa loo diray Xabsiga Dhexe ee Hargeysa.

- Aidrus (16) waxa lagu xidhay Hargeysa February 2019. Waxa lagu eedeeyey in uu xaday telefoon. Garsoore ayaa danbiga ku helay kuna xukumay 2 sanno oo xabsi ah. Waxa loo diray Xabsiga Dhexe ee Hargeysa.

- Keyse (17) waxa la xidhay June 2019 waxana lagu helay budhcad in uu xaday telefoon. Waxa lagu xidhay 2 sanno oo Xabsiga Mandheera ah. April 2020 ayaa lagu sii daayey Cafiskii Madaxweynaha.

- Mohamed (15), Sayid (15), Abdi (15), Hassan (15), Ahmed (15) and Garad (15) waxa lagu xidhay Hargeysa February 2019. Waxa lagu eedeeyey in ay xadeen telefoon. Danbiga ayaa lagu helay waxana lagu xukumay 2 sanno oo xabsi ah. Waxa loo diray Xabsiga Mandheera. Inamada waxa lagu sii daayey Cafiskii Madaxweynaha ee May 2020.

- Jimaale (15) waxa lagu xidhay Hargeysa April 2019. Waxa lagu eedeeyey in uu xaday telefoon. Danbiga ayaa lagu helay waxana lagu xukumay 1 sanno May 2019. Waxa loo diray Xabsiga Mandheera Waalidkii ayaa bixiyey si xukunkiisa loogu baddelo ganaax waxana la sii daayey July 2019.

- Jibril (15) iyo Sakariye (16) waxa lagu eedeeyey in ay xadeen telefoon waxana la xidhay June 2019. Garsoore Hargeysa jooga ayaa ku helay danbiga kuna xukumay 2 sanno. Waxa loo diray Xabsiga Mandheera. Racfaan ay ka qaateen kiis kooda awgeed, xukunkooda waxa lagu soo koobay intii ay ku jireen waxana la sii daayey April 2020.

Go'aanka ay ka go'an tahay hay'adaha ammaanka in xabsiga loo diro dhallinyarta telefoonada xadaa sidoo kale waxa ay ka dhacdaa goobaha ka baxsan caasimadda.

- Abib (15) waxa lagu xidhay Gabiley October 2019. Waxa lagu eedeeyey in uu xaday telefoon isla markaa isticmaalay lacagtii ku jirtay. Garsoore ayaa danbiga ku helay kuna xukumay 6 sanno iyo ganaax lacageed oo dhan 7 milyan Somaliland Shillings. Waxa loo diray Xabsiga Gabiley si uu ugu qaato mudada xukunkiisa. Maxkamadda Racfaanka ayaa soo yaraysay mudadii xukunka kana dhigtay 3 billood iyo ganaax lacageed oo dhan 600,000 Somaliland Shillings January 2020.

- Muse (16) Burco ayaa lagu xidhay October 2019 telefoon uu xaday. Maxkamadda ayaa danbiga ku heshay kuna xukuntay 3 sanno iyo ganaax 2 milyan oo Somaliland Shilling ah January 2020. Waxa loo diray Xabsiga Burco.

- Abdihakeem (17) iyo Deeq (15) waxa lagu xidhay Burco kadib markii lagu eedeeyey in ay xadeen telefoon. Danbiga ayaa lagu helay waxana lagu xukumay 3 sanno March 2020. Waxa loo diray Xabsiga Burco.

Dhallinyarta sidoo kale muddo dheer oo xabsi ah ayaa loo diraa danbiyo kale sida dagaalka oo kale.

- Sharmarke (16), Abdinajah (15) iyo Abdirahman (17) waxa lagu xidhay dagaal ay galeen iyo in ay qof dhaawaceen October 2019. Waxa la hayey ka hor iyo intii dacwaddoodu socotay 5 billood Xabsiga Dhexe ee Hargeysa. Danbiga ayaa lagu helay laguna xukumay 2 sanno April 2020. Qoyskoodu waxa ay galeen heshiis xeer dhaqameed ah waxayna bixiyeen dhaawicii ay geysteen, balse wiilasha waxa loo diray Xabsiga Hargeysa.

- Saddam (15), Faisal (17), Abdiaziz (17), Ahmed (16), iyo Ridwan (17) waxa la xidhay February 2020 waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Mohamed Mooge. Waxa lagu eedeeyey in ay gaadhi ka xadeen laptop. March 2020, ayaa lagu helay danbiga waxana lagu xukumay 1 sanno iyo 6 billood oo xabsi ah. Inamada waxa lagu sii daayey Cafiskii Madaxweynaha May 2020.

- Mudasir Adem, (16) waxa lagu xidhay oo lagu hayey Saldhigga Booliska ee Koodbuur kadib markii lagu eedeeyey in uu gaadhi la baxsaday si uu ugu soo tamashleeyo. Garsooraha ayaa go'aansaday in uu danbiile yahay kadib markii uu gaadhiga kaxaystay soona celiyey markii uu ka xeeyey. Waxa lagu xukumay 1 sanno oo xabsi ah February 2020. Waxa lagu sii daayey Cafiskii Madaxweynaha ee May 2020.

Arrintan oo kale waxa ay ka dhacdaa goobaha ka baxsan Hargeysa.

- Abdifatah (17) waxa lagu xidhay Baligubedle kadib markii lagu eedeeyey in uu dab qabad siiyey doogga qof beer leh. Waxa uu ku andacooday in ay kama ahayd. Danbiga ayaa lagu helay waxana lagu xukumay 3 sanno Xabsiga Baligubedle May 2018. Abdifatah waxa lagu sii daayey Cafiskii Madaxweynaha ee April 2019.

## Maxaa u baahan in la baddelo?

Qoysasku waa in ay haystaan dhokumenti caddaynaya da'da carruurtooda. Caddaymaha lagu kalsoon yahay sida shahaadadda dhalashada, inta badan Somaliland qoysasku ma haystaan, sidaa awgeed da'da ilmaha si fudud ayaa su'aal looga keeni karaa. Taxanihii Koowaad ee *Fashil Wadareed* waxa uu ka hadlay muhiimadda ay leedahay in la hayo caddaynta da'da ilmaha si loo xaqiijiyo in aan carruurta 14 jir ama ka yar aan la marin ciqaabta danbiilaha. Sidoo kale waxa ay muhiim u tahay dhallinyarta da'doodu u dhaxayso 15 illaa 17 marka ay danbiga geystaan. Dhallinyartu waxa ay u baahan yihiin in ay caddeyaan da'dooda, haddii lagu murmo, si ay uga faa'ideystaan dhawristaa sharci ee ay helayaan dhallinyartu. Tusaale ahaan, haddii uu qofka dhallinyarta ahi yahay 18 jir markii danbiga lagu helay balse uu ahaa 17 jir markii uu danbiga galay, waxa uu u baahan yahay caddayn arrintan ku saabsan si uu garsooruhu ugu ciqaabo inuu yahay ilmo yar. Haddii uuna caddeyn karayn in 18 jirku u soo galay intii dacwaddda maxkamaddu socotay, waxa xukunka loogu ridayaa sidii oo uu yahay qof weyn.

Garsooreyaashu waaa in ay tixgeliyaan isla markaa isticmaalaan dhaqancelinta in kasta oo qaybaha uu dhaqancelinta ee xeerka ku xusan aan la dhaqan gelin. Qaybaha dhaqancelinta ee ku xusan Xeerka Garsoorka Carrurtu waxa ku jira Saraakiisha Asluubta Dhaqancelinta.[16]

Waa Saraakiisha xukuumadda ee u qaabilsan dabagalka ilma si ay u xaqiijiyaan in uu samaynayo wixii garsooruhu ku amray. Tusaale ahaan, haddii garsooruhu ku amray ilmaha in uu tago dugsiga ama uu waqti la qaato qoyskiisa/qoyskeeda, waa masuuliyadda sarkaalka asluubta dhaqancelinta in uu hubiyo in uu fulinayo amarkii, warbixina ka soo siiyo garsooraha. Kaallintani weli maaha mid jirta. Balse arrintani in ay ka hor istaagto maaha garsooreyaasha in ay ka leexdaan go'aanka dhaqancelinta. Waxa jira fursado kale oo ay kamid tahay raali-gelin rasmi ah oo qoraal ah iyo in uu magdhaw siiyo dhibanaha, taas oo ay u fududahay garsooraha in uu hubiyo in ilmuhu u hoggaansan yahay.

[16] Qodobka 71, XNGC.

Xeer-ilaaliyaashu sidoo kale waa in ay isticmaalaan awoodood gaar ahaaneed si uu u xaqiijiyo in carruurto ayna xabsiga ku qaadanayn muddo dheer. Xeerku waxa uu siinayaa xeer-ilaaliyaasha awoodda ay ku dooran lahaayeen dambiga ay ku soo Eedaynayaan iyo marka ay rafcaan qaadanayaan.[17] Xeer-ilaaliyaashu waa in ay u soo Eedaeeyaan dacwadda si waafaqsan xaqiiqooyinka kiiska, balse waa in ayna ku salayn ciqaabta ay jecel yihiin in ay ku cabsi geliyaan danbiyo la mid ah. Kiisaska telefoonada la xaday, waxa habboon in ay ku soo Eedeeyaan tuugannimo. Budhcada waa in lagu soo Eedeeyaa kaliya marka ay jirto caddeyn in xoog lagu dhacay telefoonka ama hanjabaad jirtay. Sidoo kale, xeer-ilaaliyaashu waxa ay leeyihiin xaqa in ay racfaan qaataan. Xeer-ilaaliyaashu waa in ay racfaan qaataan kaliya haddii ay dan u tahay ilmaha.

[17] Qodobada 70 iyo 227, Xeerka Habka Ciqaabta (1963).

# IN AAD QAYB KA NOQOTID XALKA:

## Maxaad samayn kartaa si aad gacan uga geysatid?

Dhammaanteen waxa aynu qaadi karnaa tallaabooyin fudud si aynu u xaqiijino in carruurtu ay helaan dhawristaa sharci.

- Haddii aad tahay waalid ama qof ka masuul ah qof dhallinyaro ah, hubi in aad gacanta ku haysatid caddeyn qoraal ah oo muujinaysa da'da ilmahaaga. Waxa aad caddeyn kartaa da'dooda haddii danbi lagu soo oogo. Haddii ay yihiin If they are 15, 16 ama 17 jir, marka koowaad weydii garsooraha haddii danbigan ay suurtagal tahay in cafis garsoore lagu sii deyn karo. Haddii ayna suurtagal ahayn, waa in aad weydiisaa garsooraha suurtagalnimada in dhaqancelin loo diro. U sheeg garsooraha haddii ilmahaagu tago dugsiga, haddii ay qoyska caawiyaan, iyo in aad xaqiijinaysid in ay raacayaan amarka garsooraha. Haddii ayna suurtagal ahayn cafiska garsooraha iyo dhaqancelintu, weydii haddii ciqaabta laga yarayn karo. Haddii aad awoodid qareen, iyaga ayaa masuul ka ah in ay la hadlaan garsooraha. Balse hubi in qareenku garanayo da'da ilmaha iyo in uu ka faa'ideyn karo dhawristaa sharci. Haddii aanad awoodin qareen, waxa aad la xidhiidhi kartaa hay'adaha xuquuqal insaanka ama hay'adaha bixiya adeegga lacag la'aanta ee kaalmada sharci.

- Haddii aad tahay macallin ama aad ka shaqaysid dugsi, la wadaag xogtan waalidiinta ardayda. In ay xaqiijisid in waalidku helaan xogtan waxa ay ka caawinaysaa ardaydaadu in ay xabsi ka badbaadaan dugsigana joogaan.

- Haddii aad ka shaqaysid NGO ka hawlgala arrimaha caruurta iyo dhawrista carruurta la xidhiidha, u sheeg qoysaska aad la shaqaysid in dhallinyarta da'doodu u dhaxayso 15 illaa 17 sanno aan loo xukumin sida dadka waaweyn, in loo tixgelin karo dhaqancelin, cafis garsoore ama in ciqaabta laga dhimo.

- Haddii aad tahay suxufi ama aad ka shaqaysid warbaahinta, wax ka qor carruurta xabsiyada ku jira. Haddii ay jiraan dhallinyar sannado badan ugu jira xabsiga danbi fudud oo ay galeen, la xidhiidh qoyskooda arrintana u soo bandhig dadweynaha. Isticmaal qisada adiga oo dadweynaha tusaya in dhallinyarta da'doodu u dhaxayso 15 illaa 17 aan loo xukumin sida dadka waaweyn una sheeg in ay jiraan xeerar qoran oo si adag uga difaacaya carruurta in ay muddo dheer ku qaataan xabsiga.

- Haddii aad tahay garsoore, waxa aad udub-dhexaad u tahay sidii loo hirgelin lahaa xeerarkaas. Waa adiga qofka go'aanka qaadanaya. U isticmaal xeerka si aad u xaqiijisid in ilmuhu ka badbaado xabsiga.

- Haddii aad tahay xeer-ilaaliye, door muhiiim ah ayaad ka ciyaari kartaa in aad xaqiijisid in aan ilmaha lagu xukumin bilo ama sannado uu ku qaato xabsiga. Isticmaal awooddaada adiga oo si caddaalad ah ugu soo eedaynaya dacwadda dhallinyarta, kiiskana racfaan ka qaado kaliya haddii ay dan u tahay ilmaha.

- Haddii aad tahay sarkaal booliis, sida aad uga hawlgashid qabashada carruurtu aad ayay muhiim u tahay sababtoo ah waa tallaabadii koowaad ee uu ka sixmi lahaa ama ka qallaacsami lahaa caddaaladdu. Xadhiga samee kaliya haddii ay jirto caddeyn xooggan oo danbiga ah. Ka hor inta aanad qorin da'da ilmaha, waalidka ilmaha ka xaqiiji da'diisa.

- Qof kastaa gacan ayuu ka geysan karaa sidii loo xaqiijin lahaa in carruurtu helaan dhawristaa sharci iyaga oo xogtan la wadaagaya qoyskooda, jaarkooda, asxaabtooda, dadka ay shaqo-wadaagta yihiin iyo bulshada. Maxkamadda, eedaysaneyaashu waa in ay naftooda difaacaan. Waxayna isdifaaci karaan kaliya haddii ay garanayaan xeerarka. In aad qof u sheegtid cafiska, dhaqancelinta, iyo ciqaabta oo laga yareyn karo dhallinyarta da'doodu u dhaxayso 15 illaa 17 sanno waxa ay saameyn ku yeelan kartaa mustaqbalka ilmaha iyo qoyskoodaba.

*Waxa aanu soo dhawaynaynaa talobixinaha ka imanaya akhristayaasha ee khusaysa sida arrinta lagaga hadlayo warbixintan loogu faafin lahaa si baahsan dhagaystayaal kala duduwan tiiyoo ujeedadu tahay ilaalinta dhamaan caruurta ku nool Somaliland.*

***Hay'adda Horizon waa Urur Maxalli ah oo ka hawlgala Somaliland kana shaqeeya sidii loo horumarin lahaa sarreynta sharciga iyo xuquuqal insaanka. Warbixinaha iyo daraasadaha aanu soo saarnaa waxa ay daah-furaan arrimaha taaggan ee lagu ogaaday shaqada aanu qabano. Waxa ay bixiyaan xog iyo gorfeyn loogu tallo galay in ay cariso doodda ka dhaxaysa daneeyeyaasha, dadweynaha iyo deeq-bixiyaasha iyo in ay kor u qaado siyaasadaha xukuumadda iyada oo lagu salaynayo qadarinta xuquuqal insaanka, sarraynta sharciga iyo dhiirigelinta isku filaanshaha.***

***Si aad wax badan uga ogaatid hawsha aanu qabano, fadlan booqo degalka internet-ka aanu ku leenahay ee www.thehorizoninstitute.org nagala socda Twitter @Horizon_SL iyo Facebook @HorizonInstituteSomaliland.***

***Wixii macluumaad dheeraad ah ee aad u baahan tahay, waxa aad nagala soo xidhiidhi kataa email-ka info@thehorizoninstitute.org iyo telefoonada +252 523603/ +252 711208.***

## NALA SOO XIDIIDH

6th Floor, Omar Hashi Building
Hargeisa, Somaliland
+252 523603/ 0633751063

1st Floor, Sagal Jet Building
Burao, Somaliland
+252 711208

info@thehorizoninstitute.org

## Soo booqo baraha internet-ka

www.thehorizoninstitute.org

Twitter: @Horizon_SL

Facebook: @HorizonInstituteSomaliland

Sawirrada oo dhan waxa qaaday Petterik Wiggers